



DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA
DHOOOL GAZETA
Somali Regional State
የሱማሌ ክልላዊ መንግሥት

Qimaha የንዳ. ዋጋ Unit Price	Dhool Gazeta Waxaa Soo Saara Golaha Xildhibaanada Dawladda Deegaanka Soomaalida	✉ 392
Bayaan Tirsi- 210/2014	አዋጅ ቁጥር 210/2014	Proclamation No:- 210/2022
Bayaanka Komishinka Booliska Asluubta ee Dawladda Deegaanka Soomaalida Bog 1	የሱማሌ ክልላዊ መንግሥት የማረጋገጫ ፖሊስ ኮሚሽን አዋጅ..... ገጽ 1	Somali Regional State Prison Police Commission Proclamations.....Page 1

BAYAAN TIRSI:- 210/2014
BAYAANKA KOMISHINKA
BOOLISKA ASLUUBTA EE
DAWLADDA DEEGAANKA
SOOMAALIDA

Maadaama oo ay muhiim noqotay in dib loo qaabeeyo komsihinka asluubka dawlada Deegaanka Soomaalida, si loo fududeeyo fulinta go'aanada Maxkamadaha ee la xidhiidha dhaqancelinta iyo daryeelka maxaabiista.

Maadaama oo ay lagama maarmaan noqotay in la abuurto nidaam fududeynaya in maxaabiistu dib ugu noqdaan bulshada kadib marka ay dhamaystaan xukunka iyagoo dhaqan suuban leh islamarkaana ka fayow caadooyinka xun-xun ee sababa gelista faldambiyeedyada.

Maadaama oo ay lagama maarmaan noqotay in la dhiso qaab-dhismeed dawladeed oo ilaaliya xuquuqda maxaabiista ee lagu xeeriyay dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka islamarkaana bulshada ka qaybgeliya dabagalka arrimahan.

አዋጅ ቁጥር:-210/2014
የሱማሌ ክልላዊ መንግሥት የማረጋገጫ ፖሊስ
ኮሚሽን አዋጅ

የሱማሌ ክልላዊ መንግሥት የማረጋገጫ ፖሊስ ኮሚሽን ተቀባይነት ያላቸው የእስረኛ አያያዝ ደረጃዎችን ባከበረ ሁኔታ በፍርድ ቤቶች የሚሰጡ ውሳኔዎችን ማስፈጸም በሚያስችል ሁኔታ ማደራጀት በማስፈለግ፤

ማረጋገጫ ቤቶች የእስረኞችን ሰብአዊ ክብርና መብት በማክበር እንዲሁም የእስረኞቹ ግላዊ ሁኔታ በሚጠይቀው የፍርድ አፈፃፀምና እርግን ሰልፋቸውን ተግባራዊ በማድረግና ከሕብረተሰቡ ጋር የሚቀላቀሉበትን ሥርዓት መደንገግ በማስፈለግ፤

ማረጋገጫ ቤቶች በሕገ-መንግሥቱና ሕገ መንግሥቱን መሠረት አድርገው የወጡ ሕጎችን የተመሰረተ መላው ሕብረተሰብ በእኩልነትና በፍትሃዊነት የሳተፌ የእስረኞች አያያዝ የተመሰረተ ተቀላጠፈ አገልግሎት ሊሰጡ የሚችሉበትን መንግሥታዊ ተቋም መዘርጋት አስፈላጊ በመሆኑ፤

PROCLAMATION NO. 210/2022
SOMALI REGIONAL STATE
PRISON POLICE COMMISSION
PROCLAMATION

WHERE AS, it is found necessary to establish the Somali Regional State Prison Police Commission in a manner that would allow it enforce court decisions that respect the standards for the treatment of prisoners;

WHERE AS, it is necessary to put in place a system whereby prisoners are reintegrated into society, prisons respect the human dignity of prisoners and enforce judicial orders and corrective measures based on the particular circumstances of the prisoners;

WHERE AS, putting in place an efficient legal framework where prisons treat prisoners as well as society based on principles of equality and fairness is found necessary;

Maadaama oo la garwaaqsaday in kala soocida maxaabiista iyadoo lagu salaynayo sinjigooda, da'da iyo khatarta ka iman karta ay muhiim u tahay dhaqancelintooda iyo ilaalinta badbaadada maxaabiista guud ahaan.

Hadaba, Golaha Xildhibaanada oo ka duulaya Farqada (3) (b), ee Qodobka 49^{aad} ee dastuurka Dib loo Habeeyay ee Deegaanka waxa uu Bayaaminayaa sidan:

QAYBTA KOOBAAD
GUUD AHAAN

1. Cinwaan Gaaban

Bayaankan waxaa loogu yeedhi karaa “Bayaanka Komishinka booliska Asluubta Dawladda Deegaanka Soomaalida ee Bayaan Tirsi: 210/2014”.

2. Qeexid

Hadaan haboonaanta weedhu siinin macno kale, Bayaankan dhexdiisa;

1. “Komishin” waxaa loola jeedaa Komishinka booliska Asluubta dawladda deegaanka soomaalida ee lagu aasaasay qodobka 4^{aad} ee Bayaankan.
2. “Guddiga hogaamiyeyaasha bulshada” waxaa loola jeedaa guddiga isku dhafka ah ee ka kooban hogaamiyeyaasha qaybaha bulshada ee lagu aasaasay qodobka 13^{aad} ee Bayaankan.
3. “kulliyada tabobarka booliska” waxaa loola jeedaa kulliyada tabobaraka booliska ee lagu aasaasay xeernidaameedka tirsigiisu yahay:141/2007.
4. “Booliska Asluubta” waxaa loola jeedaa xubnaha booliska ee uu qorto, tabobaro islamarkaana hawlgeliyo komishinku.

እስረኞች ባላቸው የአደገኛነት ባህሪ ወይም ባላቸው የጉዳት ተጋላጭነት ወይም በፆታቸው እንዲሁም ክፍርድ በፊት በማረፊያ ቤቶች የሚቆዩ እስረኞች ሊደረግላቸው የሚገባውን አያያዝ መደንገግ በማስፈለገ፤

የክልሉ ምክር ቤት በተሻሻለው የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት ሕገ መንግሥት አንቀጽ 49 ንዑስ አንቀጽ 3 /ሀ/ መሠረት የሚከተለው ታውጇል።

ክፍል አንድ
ጠቅላላ

1. አጭር ርዕስ

ይህ አዋጅ “የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት የማረሚያ ፖሊስ ኮሚሽን አዋጅ ቁጥር 210/2014 ተብሎ ሊጠቀስ ይችላል።

2. ትርጓሜ

የቃሉ አገባብ ሌላ ትርጉም የሚያሰጠው ካልሆነ በስተቀር በዚህ አዋጅ ውስጥ፡ -

1. “ኮሚሽን” ማለት በዚህ አዋጅ አንቀጽ 4 የተቋቋመው የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት የማረሚያ ፖሊስ ኮሚሽን ነው፤
2. “የማህበረሰብ መሪዎች ኮሚቴ” ማለት በዚህ አዋጅ አንቀጽ 13 መሠረት የተቋቋመ ከተሰያዩ የማህበረሰብ ክፋሎች የተወጣጣ ኮሚቴ ነው፤
3. “የፖሊስ ማሰልጠኛ ኮሌጅ” ማለት በደንብ ቁጥር 141/2007 መሰረት የተቋቋመ የፖሊስ ማሰልጠኛ ኮሌጅ ነው።
4. “የማረሚያ ፖሊስ” ማለት መሠረታዊ የሆነ የማረሚያ ፖሊስ ሙያ ሥልጠና ተሰጥቶት በኮሚሽኑ ተቀጥሮ የሚሠራ የማረሚያ ቤት ፖሊስ ነው፤

WHERE AS, it is found necessary to provide for provisions on treatment of prisoners and those in custody on remand based on the degree of danger they pose and their level of vulnerability including on account of gender;

NOW, THEREFORE, The State Council in accordance with Sub- Articles 3(A) of Article 49 of the Revised Constitution of the Somali Region, it is hereby proclaimed as follows;

PART ONE
GENERAL

1. Short Title

This Proclamation may be cited as the “Somali Regional State Prison Police Commission Proclamation No. 210/2022”.

2. Definition

In this Proclamation, unless the context requires otherwise:

1. “Commission” means the Somali Regional State Prison Police Commission established under Article 4 of this Proclamation;
2. “Community Leaders Committee” means Committee consist of leaders of defferent groups of the Community established pursuant to Article 13 of this Proclamation;
3. “Police Training College” means the police training College established under Regulation No 141/2007.
4. “Prison Police” means police who is employed by the Commission after undergoing a basic training in prison warden ship.

5. “Xabsi” waxaa loola jeedaa waxaa loola jeedaa xarumaha komishinku u aasaaso dhaqancelinta maxaabiista xukuman iyo haynta maxaabiista amarka xabsi ku haynta maxkamadu usoo qortay.

6. “Xabsiga madaniga” waxaa loola jeedaa xarunta ama dhismaha komishinku u diyaariyay haynta dadka aan weli la xukumin iyo kuwa loo xidhay fulinta xukunada dacwadaha madaniga ah.

7. “Maxbuuska xukuman” waxaa loola jeedaa maxaabiista dhaqancelinta u socoto ee xukuman, shaqsiyaadka kiisaskoodu socdaan iyo shaqsiyaadka loo xidhay fulinta xukunada dacwadaha madaniga ah.

8. “Eedayane” waxaa loola jeedaa qofka kiis ciqaab ahi kaga socdo maxkamadaha islamarkaana xabsi ku haynta ay u soo qorto komishinka maxkamadaas.

9. “Maxbuus caruur ah” waxaa loola jeedaa maxbuuska da’diisu ka hoosayso 18 sano.

10. “Qof” Waxaa loola jeedaa Qofka bani’aadamka ah iyo waxyaabaha kale ee sharcigu siiyay jiritaan sharci.

11. Weedhaha Bayaankan dhexdiisa ee loo xeeriyay Labku waxay sidoo kale dhaqangal ku yihiin Dhedigga.

3. Mabaadii’da

1. In komishinka la siiyo awoodaha iyo waajibaadyada lagama maarmaanka ah ee uu ku xaqiijin karo saraynta sharciga, ilaalinta xuquuqaha maxaabiista iyo dhismaha boolis leh anshax suuban.

5. “ማረጫያ ቤት” ማለት ለሕዝብ በግልጽ የሚታወቅ ታራሚዎች የተወሰነባቸውን ፍርድ የሚፈፀሙበት፣ የሚታረሙበትና የሚታነፁበትን እንዲሁም ማረፊያ ቤትን ይጨምራል፤

6. “ማረፊያ ቤት” ማለት የመደበኛ ክስ ተከፍቶ በቀጠሮ ላይ ያሉ ተከላኾች ወይም የፍትሐ ብሔር የአፈፃፀም ክርክር በተሰጠ ትዕዛዝ የሚቆዩበት ነው፤

7. “እሰረኛ” ማለት በፍርድ ቤት የተወሰነበትን ፍርድ በማረጫያ ቤት ውስጥ በመፈፀም ላይ የሚገኝ ታራሚ፣ ተከላኸ ወይም የፍትሐብሔር ፍርድ አፈፃፀም የተሰጠ ትዕዛዝ ታሳሪ ነው፤

8. “ተከላኸ” ማለት በወንጀል ሂደት ማረፊያ ቤት የሚቆይ ሰው ነው፤

9. “ወጣት እሰረኛ” ማለት እድሜው ከአስራ ከአስራ ስምንት ዓመት በታች የሆነ እሰረኛ ነው፤

10. “ሰው” ማለት የተፈጥሮ ሰው ወይም በሕግ የሰውነት ሙብት የተሰጠው አካል ነው፤

11. በዚህ አዋጅ ውስጥ ለወንድ ያታ የተገለፀው የሴትንም ያታ ያጠቃልላል።

3. መርህ

1. ኮሚሽኑ የህግ የበላይነትን ለማስፈን፣ የታራሚዎችን ሙብት ለማስከበር እና የፖሊስ ሃይል ግንባታን በመልካም ስነምግባር ለማረጋገጥ የሚያስችል አስፈላጊ ሥልጣንና ኃላፊነት ሊሰጠው ይገባል።

5. “Prison” means a publicly known Correctional Institution where sentenced prisoners serve their terms, are reformed and rehabilitated; and includes custodial places for prisoners held on remand.

6. “Detention Center” means place where arrested persons held on remand are kept or place where judgment debtors in civil proceedings are held.

7. “Convicted prisoner” means prisoner under correction, accused person or detainee of civil proceedings.

8. “Accused Person” means a person held in custody on remand in a criminal proceeding.

9. “Juvenile prisoner” means a prisoner whose age is under eighteen years of old.

10. “Person “means a natural or legal person;

11. Expressions in the masculine gender shall also apply to the feminine gender.

3. Principle

1. The Commission shall be given the necessary powers and responsibilities that enable to ensure the rule of law, the protection of the rights of prisoners and the building of a police force with good conduct.

2. Ujeedada guud ee haynta maxaabiistu waa xaqiijijnta dhaqancelinta iyo ilaalinta xuquuqahooda iyadoo la suurtoogelinayo in maxaabiistu markay xukunkooda dhamayataan inay noqdaan kuwo waxsoosaar leh, shaqaystaan islamarkaana bulshada la noolaan karaan.

3. In la suurtoogeliyo in Komishinku waajibbaadkiisa u fuliyo nidaam cadcadaan ku dheehantahay islamarkaana is aamin ka dhex dhalinaya bulshada iyo shacabka.

QAYBTA LABAAD

KOMISHINKA BOOLISKA

ASLUUBTA

4. Aasaaska Komishinka

1. Waxaa bayaankan lagu aasaasay Komishinka booliska Asluubta Dawlada deegaanka soomaalida oo wixii hadda ka dambeeya loogu yeedhi doono “Komishin” ahna hay’ad dawladeed oo leh dhammaan xuquuqaha sharciyeed, iskeedna u taagan.

2. Komishinku wuxuu hoos tagaysaa Xafiiska Cadaaladda.

5. Xarunta Komishinka

Xarunta Komishinku iyadoo ah Magaalada Jig jiga ayay laamo ama xafiisyo ku yeelan karaa Gobolada, maamul magaalooyinka iyo goobaha kale ee lagama maarmaanka ah ee deegaanka gudihisa.

6. Ujeedada komishinka

Ujeedada guud ee komishinku waa fulinta xukunada iyo amarada maxkamadaha, ilaalinta xuquuqda maxaabiista, hirgelinta barnaamijyo waxbarasho iyo tabobaro maxaabiista la siinayo iyo suurtoogelinta dhaqancelinta maxaabiista guud ahaan si looga dhigo kuwo dastuurka u hogaansan, anshax suuban leh islamarkaana wax soosaar leh.

2. የማረጋገጫ ቤት አያያዝ ዋና ዓላማ የእስረኞችን ሰብአዊ ክብር እና መብታቸውን በማክበር ታርመው እና ታንፀው ሕግ አክባሪ፣ መልካም ሥነ-ምግባር ያላቸው፣ ሰላማዊና አምራች ዜጎች ሆነው ወደ ህብረተሰቡ እንዲቀላቀሉ የሚያስችል ይሆናል።

3. ኮሚሽኑ ለሕግ፣ ለመንግሥት እና ለሕዝብ ያለበትን ተጠያቂነት በማረጋገጥ ሥራውን በግልፅኝነት ያከናውናል።

ክፍል ሁለት

የማረጋገጫ ፖሊስ ኮሚሽን

4. ኮሚሽኑ ስለመቋቋም

1. የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት ማረጋገጫ ፖሊስ ኮሚሽን (ከዚህ በኋላ “ኮሚሽን”) እየተባለ የሚጠራ ራሱን የቻለ የሕግ ሰውነት ያለው የመንግሥት አካል ሆኖ በዚህ አዋጅ ተቋቁሟል።

2. የኮሚሽኑ ተጠሪነት ለፍትህ ቢሮ ይሆናል።

5. ዋና መሥሪያ ቤት

የኮሚሽኑ ዋና መሥሪያ ቤት ጂግጂጋ ሆኖ እንደአስረኛነቱ በማናቸውም የክልሉ ዞኖችና ከተማ አስተዳደሮች ቅርንጫፍ ሊያቋቁም ይችላል።

6. የኮሚሽኑ ዓላማ

የኮሚሽኑ ዓላማ የፍርድ ቤት ትዕዛዝና የቅጣት ውሳኔ በማስፈፀም፣ እስረኞችን በመቀበል፣ መብታቸውን በማክበር፣ ሰብአዊ ክብራቸውን በመጠበቅና መሠረታዊ ፍላጎታቸውን በማሟላት፣ ለእስረኞች የሥነ-ልቦና፣የቀለምና የሙያ ሥልጠና በመስጠት ምግባር ለውጥ እንዲያመጡና የአስተሳሰብና የሥነ ሕግ አክባሪ፣ ሰላማዊና አምራች ዜጎች እንዲሆኑ ማስቻል ነው።

2. Treatment of prisoners shall ensure prisoners are treated with human dignity they deserve, and that they are reformed to be law abiding citizens with good conduct and become peaceful and productive members of the community they reintegrate into.

3. The Commission shall operate in a manner that enables ensuring its accountability to the law, government and the people, carry out its obligations in a transparent manner.

PART TWO

PRISON POLICE COMMISSION

4. Establishment

1. The Somali Regional State Prison Police Commission (hereinafter called the “Commission”) is hereby established as an autonomous Government Organ having its own legal personality.

2. The Commission shall be accountable to the Justice Bureau.

5. Head Office

The head office of the Commission shall be in Jig-jiga and may have branch offices in any of the Zonal centers or in City Administration in the Region where necessary.

6. Objective of the Commission

The objectives of the Commission shall be enforcing sentences and judicial orders, respecting the rights of prisoners under its care, fulfilling their needs and upholding their human dignity; offer psychological, academic and vocational trainings to prisoners so that they are ethically as well as attitudinally rehabilitated which will in turn help in ensuring that they are law abiding, peaceful and productive citizens.

7. Xilka iyo waajibaadka Komishinka

Komishinku wuxuu yeelanayaa xilkan iyo waajibaadyadan:

1. Wuxuu xulaa islamarkaana u gudbiyaa kulliyada tabobarka booliska xubnaha loo xulanayo booliska asluubta iyo xirfadleyaasha kale markay tabobarka dhamaystaana wuu shaqo geliyaa.
2. Wuxuu suurto geliyaa in tabobaro gaagaaban iyo kuwo waqti dheer oo lagu kobcinayo aqoonta iyo xirfadaha booliska asluubta iyo xirfadleyaasha kaleba loo qabto.
3. Waxa uu hab waafaqsan bayaankan iyo xeernidaameedka uu soo saaro Golaha Hawlfulinta u dalacsiiyaa, abaal marin u siiyaa, mushaar kordhin u sameeyaa, hoos u dhigaa kana qaadaa talaabada ku haboon ka qaataa xubnaha booliska asluubta.
4. Wuxuu suurto geliyaa in hoy loo sameeyo xubnaha booliska asluubta.
5. Wuxuu deegaanka ka dhisaa xabsiyada ku haboon dhaqancelinta, daryeelka iyo ilalainta xuquuqda maxaabiista.
6. Wuxuu hab waafaqsan amarka maxkamada u gudoomaa, ilaaliyaa, u maamulaa, maxkamada u dhaweeyaa, dhaqancelin ugu sameeyaa islamarkaana fuliyaa amarada kale ee ay maxkamaduhu siiyaan.
7. Wuxuu maxaabiista siiyaa cuno, hu, hoy iyo adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah.
8. Wuxuu hirgeliyaa goobo maxaabiistu ku qaadato waxbarasho iyo tabobaro kala duwan oo ka dhigay kuwo waxsoosaar leh islamarkaana noloshooda maarayn kara.

7. የኮሚሽኑ ሥልጣንና ተግባር

ኮሚሽኑ የሚከተሉት ሥልጣንና ተግባራት ይኖሩታል፡-

1. ለሕገ-መንግሥቱ እና ለሙያው ታማኝ የሆኑ ፅውቀትና ክህሎት ያለው የማረሚያ ፖሊስ እና የማህበራዊ ሳይንስ ባለሙያ ለማፍራት እጩ ሰልጣኞች መልምሎ ያሰላጥናል፤ ከሰልጠና ብኃላም ወደ ሥራ ያስማራል፤
2. የማረሚያ ፖሊስ አባላት እና የማህበራዊ ሳይንስ ባለሙያ የሙያና ክህሎት አቅም ለማጎልበት የሚያስችል የአጭር ጊዜና የራጅም ጊዜ ሰልጠና እንዲያገኙ ሁኔታዎችን ያመቻቻል፤
3. በዚህ አዋጅ እና በአዋጁ መሰረት በክልሉ መስተዳድር ምክር ቤት በሚወጣ ደንብ ለማረሚያ ፖሊስ የማዕረግ ሹመት፣ የዕርክን ጭማሪ፣ የኃላፊነት ክፍያና ልዩ ልዩ ጥቅማ ጥቅሞችን ተግባራዊ ያደርጋል፤
4. ለማረሚያ ፖሊስ የጋራ መኖሪያ ካምፖችን ይሠራል፤ ሁኔታዎችን ያመቻቻል፤
5. ታራሚዎችን በተመቻቻ ቦታ ማረምና ማከፊ የሚያስችሉ አዳዲስ የማረሚያ ቤት ማዕከላትን በየትኛውም የክልሉ አካባቢ ገንብቶ ያስተዳድራል፤
6. በፍርድ ቤት ውሳኔ ወይም ትዕዛዝ መሠረት የሚላኩለትን እስረኞች ይቀበላል፤ ይጠብቃል፤ ያስተዳድራል፤ ያጅባል፤ ፍርድ ቤት ያቀርባል፤ ያርማል፤ ሌሎች በሕግ ሥልጣን ባለው ፍርድ ቤት የሚሰጡ ትዕዛዞችን ይፈፅማል፤
7. ለእስረኞች ምግብ፣ መጠለያ፣ አልባሳትና ነፃ ሕክምና እንዲያገኙ ያደርጋል፤
8. ለእስረኞች ግንባታና ምርታማነት የሚያግዙ የትምህርትና ሥልጠና ተቋማት ያደራጃል፤

7. Powers and Duties of the Commission

The Commission shall have the following powers and duties.

1. Select and submit to the police College to those to be recruited as prison police and social science professionals loyal to the Constitution and their profession and have the required knowledge and skills and deploy after completing the training;
2. facilitate provisions of short and long term training to promote the knowledge and skills of prison police and other professionals' trainings and education;
3. put into effect a system of promotion and appointment of prison police members to a higher rank, pay raise, Position allowances and other benefits pursuant to this proclamation and the Regulation to be issued by the Executive Council.
4. Build prison police residential camps.
5. Build and administer prison facilities across the Region to rehabilitate prisoners adequately;
6. receive, protect, manage, escort, produce in courts of law, reform prisoners sent to it by court decisions or order; shall also execute other orders of courts having competence.
7. Provide food, shelter, clothing and free medication for prisoners.
8. Set up educational and training facilities with a view to enhancing the productivity and personal development of prisoners.

- 9. Wuxuu fuliyaa shaqooyinka iyo barnaamijyada muhiimka u ah dhaqancelinta, daryeelka iyo kobcinta aqoonta iyo waxsoosaarka maxaabiista.
- 10. Wuxuu hirgeliyaa xarumo waxsoosaar oo ay kaga shaqayn karaan aqoonta iyo xirfada lagu baray xabsiga dhexdiisa islamarkaana noqon karaan kuwo waxsoosaar leh oo shaqeysta.
- 11. Hab waafaqsan xeernidaameedka uu soo saaro Golaha hawlfulintu, wuxuu u diyaariyaa islamarkaana u gudbiyaan cida ay khusayso liiska maxaabiista u qalanta in cafis la siiyo ama lagu sii daayo amaakroo (parole) marka la go'aamiyona wuu dhaqan geliyaa.
- 12. Wuxuu xabsiyada ka hirgeliyaa u dhamaystiraa agabyada muhiimka u ah adeegyada ilaalinta nabadgelyada xabsiyada ee ay kamid yihiin hubka, gaadiidka, isgaadhsiinta, qalabyada baadhista, qalabyada ka hortaga rabshadaha, kamaradaha casriga iyo qalabyada kale ee lamidka ah.
- 13. Wuxuu hirgeliyaa daraasaadyada kor loogu qaadayo tayada adeegyada kala duwan ee komishinku siiyo maxaabiista.
- 14. Wuxuu hab waafaqsan shuruucda dhaqangalka ah xafidaa, u falanqeeayaa una gudbiyaa xogta maxaabiista cida ay khusayso.
- 15. Wuxuu hab waafaqsan shuruucda dhaqangalka ah u ururiyaa dakhliyada kasoo xerooda adeegyada xabsiga dhexdiisa lagu sameeyo islamarkaana u isticmaalaa in wax lagaga bedelo nolosha iyo daryeelka maxaabiista.

- 9. **ታራሚዎችን ለማረም፣ ለማነፅ እና ምርታማነታቸውን ለማሳደግ በሚያስችል መልኩ ያደራጃል፤ ይሠራል፤**
- 10. **ታራሚዎች በማረሚያ ቤት ቆይታቸው በሚያገኙት ትምህርትና ሥልጠና በቂ የንድፈ ሐሳብ እውቀትና ክህሎት አዳብረው የሥራ ባህልና አምራች ዜጋ ሆነው እንዲወጡ የሚያስችሉ ኢንዱስትሪዎችን ያቋቁማል፤**
- 11. **በክልሉ መስተዳድር ምክር ቤት በሚወጣ ደንብ መሠረት ለታራሚዎች በአመክሮ ወይም በይቅርታ ለመፍታት የሚያበቁ ቅድመ ሁኔታዎችን አሟልተው ሲገኙ በተዘረጋው የአሰራር ሥርዓት መሠረት በአመክሮ ወይም በይቅርታ እንዲፈቱ ለይቶ ለሚመለከተው አካል ያቀርባል፤ ውሳኔ ሲያገኝም ተግባራዊ ያደርጋል፤**
- 12. **ለማረሚያ ቤት አገልግሎት አሰፈላጊ የሆኑ ትዋቅ፣ ተሽከርካሪ፣ የፊደሎ መገናኛ፣ የፍተሻና የአድማ ብተና መሣሪያዎች፣ ሲሲቲቪ ካሜራና ሌሎች የቴክኖሎጂ ውጤቶች እንዲሟሉ ያደርጋል፤**
- 13. **የማረሚያ ቤቶችን አገልግሎት ለማሻሻል የሚረዱ ዋናትና ምርምሮችን ያደርጋል፤**
- 14. **የአሰሪኞች መረጃዎችን እና ስታቲስቲክሶችን ያሰባስባል፣ ያጠናቅራል፣ ይተነትናል፤**
- 15. **አግባብነት ባለው ሕግ መሰረት ከማረሚያ ቤቶች የሚገኙ የልማትና ሌሎች የውስጥ ገቢዎችን፣ ለአሰሪኞች ማኅበራዊ አገልግሎት ማሻሻያ እና ለአቅም ግንባታ ሥራዎች እንዲውል ያደርጋል፤**

- 9. Work towards the correction, development, and productivity of prisoners.
- 10. establish industries that could realize the theoretical knowledge and skills prisoners possess in becoming productive work force.
- 11. submit lists of prisoners to be released by parole or pardon those who meet preconditions to be released by parole or pardon according to a Regulation to be enacted by the Executive Council and release them upon a decision to that effect.
- 12. make prison resources and facilities such as prison security equipment, vehicle, radio communication equipment, search and riot control equipment, CCTV cameras and other such technological devices and equipment available.
- 13. undertake studies and research with a view to improving prison conditions and services provided by the Commission.
- 14. collect, analyze and interpret data and statistics of prisoners and submit this data to the concerned organs.
- 15. deploy resources generated through various income generating schemes within the prison system, according to relevant laws, to improve the social conditions of prisoners and capacity building initiatives.

16. Hab waafaqsan awaamiirta uu soo saarto wakaalada gaadiidka ee dalku wuxuu suurto geliyaa in maxaabiistu hesho tabobar dirawalnimo islamarkaana la siiyo fasaxa wadista gaadiidka.

17. Wuxuu xidhiidh wada shaqeyneed la sameeyaa hay'adaha dawlada iyo kuwa aan dawliga ahayn gudashada waajibbaadyada loo aasaasay komishinka.

18. Wuxuu xidhiidh wada shaqeyneed oo joogto ah la yeeshaa komishinka booliska federaalka iyo komishinada deegaanada kale si loo horumariyo nidaamka adeegbixineed ee komishinka.

19. Wuxuu hirgeliyaa xukunada bedelka u ah ciqaabta xabsi ku haynta ee ay soo saaraan maxkamadaha kala duwan.

20. Isagoo la kaashanaya cidaha kale ee ay khusayso wuxuu kormeer iyo dabagal ku sameeyaa maxaabiista xukunkii dhamaystay ama kuwa shuruudaha lagu sii daayay iyagoon dhamaysan xukunkii si loo hubiyo inay u hogaansameen ayna ku dhaqmeen shuruudaha anshaxa suuban ee hore loo saaray.

21. Wuxuu yeelan karaa hanti, gali karaa heshiis, magaciisa ayuu wax ku dacweyn karaa laguna dacweyn karaa.

22. Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee uu kaga midha dhalinayo ujeedooyinkiisa.

8. Qaab-dhismeedka Komishinka

Komishinku wuxuu yeelan:

16. የትራንስፖርት ባለሥልጣን የሚዘረጋውን ሥርዓት ጠብቆ ታራሚዎች የተሸከርካሪ መንዳት የሚያስችል ሥልጠና ተሰጥቶት የአሸከርካሪነት የብቃት ማረጋገጫ ተፈትነው እንዲወሰዱ ያደርጋል።

17. ሥልጣንና ተግባሩን በሚመለከቱ ጉዳዮች አግባብ ካላቸው መንግሥታዊና መንግሥታዊ ካልሆኑ ድርጅቶች ጋር ግንኙነት ያደርጋል፤

18. ከሌሎች ማረሚያ ቤት ፖሊስ ኮሚሽን እና ከሌሎች ክልሎች ኮሚሽኖች ጋር ስለአገልግሎት አሰጣጡን ለማሻሻል በሚቻልበት ሁኔታ ላይ ግንኙነት ያደርጋል።

19. በፍርድ ቤት በሚሰጥ ትእዛዝ መሰረት ታራሚዎችን ለማረም የሚረዱ አማራጭ የእርምት መንገዶችን ተግባራዊ ያደርጋል፤

20. እርምት ጨርሰው ወይም በሌሎች ምክንያት ከእስር የወጡ ታራሚዎችን ከሌሎች ከሚመለከታቸው አካላት ጋር በመተባበር ከእስር ሲወጡ በተቀመጠላቸው የጠባይ አመራር መሰረት ስለመፈጸማቸው ክትትል ያደርጋል።

21. ውል ይዋዋላል፤ የንብረት ባለቤት ይሆናል፤ በራሱ ሥም ይከሰላል፤ ይከሰሳል፤

22. ዓላማውን ለማስፈጸም የሚረዱ ሌሎች ተግባራትን ያከናውናል።

8. የኮሚሽኑ አቋም

ኮሚሽኑ ኮሚሽኑ የሚከተሉት ይኖሩታል:-

16. offer driving training to prisoners and its personnel through competency certificate as per requirement provided by the Directive issued by Transport Authority.

17. Communicate with relevant government and non- governmental organizations in matters relating to its powers and duties;

18. Establish a cooperative working relationship with the Federal Prison police Commission and other regional states Commissions on ways promoting system of service delivery.

19. Put in place alternative correctional measures up on decision of court.

20. supervise in cooperation with other concerned bodies whether prisoners released from jail having served their sentences or those released for different reasons have complied with behavioral management plan set during their release.

21. Enter into agreements, own property, sue and be sued in its own name.

22. Carry out other activities that could help execute its objectives.

8. Organization of the Commission

The Commission shall have:

1. Komishineer iyo komishineer ku xigeen uu magacaabo Madaxweynuhu.

2. Xubnaha booliska asluubta, geedi-socodyada iyo shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka ah.

9. Awoodaha iyo Waajibaadka Komishineerka Guud

1. Wuxuu isagoo ah madaxa ugu sareeya ee Komishinka, wuxuu haggaa, maamulaa islamarkaana kormeeraa shaqooyinka komishinka.

2. Iyadoo aan la koobayn guud ahaanta farqada 1^{aad} ee Qodobkan, Komishineerka guud;

b) Wuxuu hirgaliyaa awoodaha iyo waajibaadka lagu xusay qodobka 7^{aad} ee Bayaankan.

t) Wuxuu diyaariyaa islamarkaana u gudbiyaa Xafiiska cadaaladda u dalacsiinta iyo magacaabista koomishineerka, kuxigeenka komisheerka iyo caawiyaha komishineerka booliska asluubta, marka la ansixiyana wuu maamulaa, dalacsiiyaa, caydhiyaa xubnahan hab waafaqsan xeernidaameedka uu soo saaro golaha hawlfulintu.

j) Wuxuu diyaariyaa barnaamijyada, qorshaha iyo Miisaaniyada Komishinka ee lagu fulinayo shaqooyinka una gudbiyaa Qaybaha ay khuseyso, marka loo fasaxana hirgaliyaa.

x) Wuxuu qaabilaa, baadha islamarkaana go'aan ka gaadhaa cabashooyika ka dhanka ah booliska asluubta iyo shaqaalaha kale ee komishinka.

1. በፕሬዚዳንቱ የሚሾሙ አንድ ኮሚሽነር እና ምክትል ኮሚሽነር፤

2. የማረሚያ ፖሊስ አባላት እና ሲቪል ሠራተኞች፣ ይኖሩታል።

9. የኮሚሽነር ጄኔራሉ ሥልጣንና ተግባር

1. ኮሚሽነር ጄኔራሉ የኮሚሽኑ ዋና ሥራ አስፈጻሚ በመሆን የኮሚሽኑን ሥራዎች ይመራል፤ ያስተዳድራል፤

2. የዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ (1) አጠቃላይ ድንጋጌ እንደተጠበቀ ሆኖ ኮሚሽነር ጄኔራሉ፡-

ሀ) በዚህ አዋጅ በአንቀጽ 7 የተመለከቱትን የኮሚሽኑን ሥልጣንና ተግባራት ሥራ ላይ ያውላል፤

ለ) የኮሚሽነሮች፣ የምክትል ኮሚሽነሮችንና የረዳት ኮሚሽነሮችን የማዕረግ ሹመት እንዲፀድቅ ለክልሉ ፊትህ ቢሮ ያቀርባል፤ ከዚህ ውጭ ያሉ የማዕረግ ሹመት ይሰጣል፤ በሚወጣ ደንብ መሰረት የሥራ ምደባ ያከናውናል፤ ያሰናብታል፤

ሐ) ለኮሚሽኑ ሥራዎች የሚያስፈልገውን ዓመታዊ በጀትና የሥራ ንግግር ምደባ ያዘጋጃል፤ ሲፈቀድ በሥራ ላይ ያከውላል።

መ). ከሕዝብ፣ ከአሰሪዎች፣ ከኮሚሽኑ አባላትና ሠራተኞች የሚቀርቡትን ቅሬታዎችና አቤቱታዎች ይቀበላል፤ እንዲጣራ ያደርጋል ፤ ይወስናል፤

1. a Commissioner and Deputy Commissioner to be appointed by the President.

2. Prison police officers, Departments and othe staffs necessary for it.

9. Powers and Duties of the Commissioner General

1. The Commissioner General shall be the chief executive officer of the Commission, direct and manage the duties and responsibilities of the Commission;

2. Without prejudice to the generality of sub-article (1) of this Article, the Commissioner General shall:

a) enforce powers and duties of the Commission provided for under Article 7 of this Proclamation.

b) submit to the Justice Bureau the nomination for promotion of Commissioners, Deputy Commissioners and Assistant Commissioners for approval by the Justice Bureau; promote and assign other ranks, employ and dismiss same according to Regulation to be issued Executive Council.

c) Prepare the annual budget and work program of the Commission and authorize expenditure where the work plan and the budget proposal is approved.

d) receive, inquire into and decide on complaints and grievances directed to it from the public, prisoners, members of the Commission and its personnel;

<p>Kh) Wuxuu hab waafaqsan shuruucda quseeyisa ee maamulka shaqaalaha Dawlada ku shaqaaleeyaa, maamulaa, dalacsiiyaa, caydhiyaa shaqaalaha kale komishinka</p> <p>d) Wuxuu diyaariyaa qorshaha iyo warbixinta isticmaalka miisaaniyada rubuc kasta oo sanad miisaaniyadeedka islamarkaana u gudbiyaa xafiiska Cadaaladda.</p> <p>r) wuxuu xaqiijiyaa in hantidhawrka guduhu uu baadhis u sameeyo diiwaanada xisaabeed ee komishinka.</p> <p>s) Wuxuu mataala komishinka marka cid sedexaad heshiis ama cilaqaad shaqo wakaaladdu la yeelanayso.</p> <p>3. Marka ay dar-dargalinta shaqada awgeed lagama maarmaan u noqoto, komishineerku wuxuu awoodaha iyo waajibbaadkiisa qaybo kamid ah u wakiilan karaa shaqaalaha iyo mas'uulada kale ee katirsan Komishinka.</p> <p>10. <u>Awooda iyo Waajibbaadka Kuxigeenka Komishineerka</u></p> <p>1. Wuxuu maamulaa waaxda komishinka ee loo xilsaaray maamulkeeda.</p> <p>2. Waxa uu komishineerka guud ka caawiyaa qorshaynta, maamulka iyo fulinta waajibbaadka loo aasaasay komishinka.</p> <p>3. Waxuu fuliyaa shaqooyinka gaarka ee uu u xilsaaro komishineerka guud.</p>	<p>ሠ) በክለሱ ሲቪል ሰርቪስ ሕጎች መሠረት ድጋፍ ሰጪ የሲቪል ሠራተኞችን ይቀጥራል፤ ያስተዳድራል ፣ ያሰናብታል፤</p> <p>ረ) የኮሚሽኑ ዓመታዊ ዕቅድ፣ የሥራ ንግግራምና ሪፖርትን በማዘጋጀት ለፊትህ ቢሮ ያቀርባል፤</p> <p>ሰ) የውስጥ አዲት ሥራዎች እንዲሰሩ ያደርጋል፤ የሒሳብ ሪፖርት በማዘጋጀት ያቀርባል፤</p> <p>ሸ) ከሦስተኛ ወገን ጋር በሚያደርጋቸው ግንኙነቶች ኮሚሽኑን ይወክላል።</p> <p>3. ኮሚሽነር ጄኔራሉ ለሥራው ውጤታማነት አስፈላጊ በሆነ መጠን ከሥልጣንና ተግባሩ በከፊል በኮሚሽኑ ውስጥ ለሚገኙ ሌሎች የሥራ ኃላፊዎች በውክልና ሊሰጥ ይችላል።</p> <p>10. <u>የምክትል ኮሚሽነር ጄኔራሉ ሥልጣንና ተግባር</u></p> <p>1. በዘርፍ የሚሰተጣቸውን መደበኛ ሥራዎች ያከናውናሉ፤</p> <p>2. የኮሚሽኑን ሥራዎች በማቀድ፣ በማደራጀት፣ በመምራትና በማስተባበር ኮሚሽነር ጄኔራሉን ይረዳሉ፤</p> <p>3. በኮሚሽነር ጄኔራሉ ተለይተው የሚሰጡ ሌሎች ተግባሮችን ያከናውናሉ፤</p>	<p>e) employ, administer and dismiss supporting staff of the Commission according to pertinent laws Civil Service laws;</p> <p>f) submit quaterly work plan, performance and financial reports to the Justice Bureau;</p> <p>g) Cause the conduct of internal auditing; submit financial report.</p> <p>h) represent the Commission in its dealings with third parties.</p> <p>3 The Commissioner General may delegate part of his responsibilities and duties to the other officials of the Commission to the extent necessary for the successful implementation of its duties.</p> <p>10.<u>Powers and Duties of the Deputy Commissioner</u></p> <p>1. carry out regular duties of divisions to which they are assigned;</p> <p>2. assist the Commissioner General in the planning, organization, direction and coordination of the Commission’s responsibilities;</p> <p>3. carry out such other duties as are specified by the Commissioner General; and</p>
---	---	---

4. Wuxuu matalaa komishineerka guud ee Komishinka marka uu maqan yahay ama uunan shaqada gudan.

11. Miisaaniyada

Ilaha Miisaaniyada ee komishinku iyadoo ay tahay Miisaaniyada ay Dawladu u qoondayso. Waxa uu isticmaali karaa dakhliga kasoo xerooda alaabada iyo adeegyada uu fuliyo hab waafaqsan awaamiirta uu soo saaro xafiiska maaliyadu.

12. Diwaanada Xisaabaadka

- 1. Komishinku wuxuu yeelan islamarkaana xafidi diwaano xisaabaad oo saxan.
- 2. Diwaanada xisaabaadka iyo dhokumeentiyada lacageed ee komishinka waxaa sannad walba baadhis ku sameyn hanti dhowrka guud ama Hantidhawro uu isagu soo idmo.

QAYBTA SADEXAAD

GUDDIGA HOGAAMIYEYAASHA BULSHADA

13. Aasaaska Guddiga hogaami-veyaasha bulshada

- 1. Waxaa bayaankan lagu aasaasay Guddiga hogaamiyeyaasha bulshada oo hada wixii ka dambeeya loogu yeedhi doono “Guddiga” oo si tabarucaad ah uga shaqeeya kormeerka xabsiyada deegaanka.
- 2. Xubnaha guddiga waxa laga soo xuli hogaamin dhaqameedyada, hogaamin diimeedyada, shaqsiyaadka bulshada dhexdeeda sumcada ku leh, aqoonyahanka, xubnaha u dooda xuquuqda aadamaha iyadoo lagu xisaabtamayo ka qaybqaadashada sinjiga.

4. ኮሚሽነር ጄኔራሉ በማይኖርበት ጊዜ ምክትል ኮሚሽነር ጄኔራል ኮሚሽነር ጄኔራሉን ተክቶ ይሠራል።

11. በጀት

ኮሚሽኑ በመንግሥት ከሚመዘገቡበት በጀት በተጨማሪ ከውስጥ የሚያገኘውን ገቢ በገንዘብ ቢሮ በሚያወጣው መመሪያ መሠረት ሊጠቀም ይችላል።

12. የሂሳብ መዛግብት

- 1. ኮሚሽኑ የተሟላ እና ትክክለኛ የሆኑ የሒሳብ መዛግብት ይይዛል።
- 2. የኮሚሽኑ የሒሳብ መዛግብትና ገንዘብ ነክ ሠነዶች በዋናው አዲተር ወይም ዋናው አዲተር በሚሰይሙው አዲተር በየዓመቱ ይመረመራል።

ክፍል ሦስት

የማህበረሰብ መሪዎች ኮሚቴ

13. የኮሚቴው መቋቋም

- 1. የእስረኞችን አያያዝ የሚከታተልና የሚቆጣጠር የበጎ ፈቃደኞች የማህበረሰብ መሪዎች ኮሚቴ (ከዚህ በኋላ ኮሚቴ እየተባለ የሚጠራ) በዚህ አዋጅ ተቋቋሟል።
- 2. የበጎ ፈቃደኞች የማህበረሰብ መሪዎች ኮሚቴ አባላት በህብረተሰቡ የታወቁና ተቀባይነት ያላቸው የማህበረሰብ መሪዎች በተለይ የሃይማኖት መሪዎች፣ የባህላዊ ስርዓት መሪዎች ፣የአገር ሽማግሌዎች ፣የሰብዓዊ መብት ተሟጋቾች፣ ታዋቂ ግለሰቦች እና የመሳሰሉት ሆነው ያታወቁ ሰብዓዊና መሠረት ያደረገ ይሆናል፤

4 Represent the Commissioner General, in the absence of the Commissioner General.

11. Budget

The primary source of the Budget of the Commission is a budget allocated by the Government, however in addition to the Government allocation, the Commission may utilize its internal revenue through permission of the Bureau of Finance.

12. Books of Accounts

- 1. The Commission shall keep complete and accurate books of accounts.
- 2. The books of accounts of the Commission or financial documents shall be audited yearly by the Auditor General or an auditor designated by it.

PART THREE

COMMITTEE OF COMMUNITY LEADERS

13. Establishment of the Committee

- 1. The voluntary Community Leaders Committee (hereinafter called “the Committee”) that supervises and monitors the treatment of prisoners is hereby established.
- 2. With due consideration of gender disparity, members of the Community Committee shall be well known individuals recognized in the community, especially religious leaders, cultural leaders, elders, human right advocates, famous individuals and the like.

3. Tirada xubnaha oo ay ku jiraan guddoomiyaha iyo kuxigeenkiisu waxaa soo xulaya xafiiska Cadaaladda una gudbinaya golaha hawlfulintu si uu u ansixiyo.

4. Mudo-xileedka guddigu waa shan sano, hase ahaate xubinka waxaa dib loo magacaabi karaa mar labaad.

5. Guddigu wuxuu hoostegayaa xafiiska cadaaladda.

14. Xilka iyo waajibaadka guddiga

Guddigu wuxuu yeelayn xilkan iyo waajibaadkan:

1. Wuxuu xaqiijiyaa in nidaamka haynta, daryeelka iyo dhaqancelinta maxaabiistu uu waafaqsanyahay dastuurka, bayaankan, heshiisyada caalamiga ah ee dalku saxeeaxay iyo shuruucda kale ee dhaqangalka ah.

2. Wuxuu saraakiisha ka hawlgasha heerarka kala duwan ee qaabdhismeedka komishinka kala taliyaan kor u qaadista nidaamka daryeelka iyo dhaqancelinta maxaabiista.

3. Hadii komishinku ku guuldareysto dhawrista iyo fulinta talooyinka loogusoo jeediyay hab waafaqsan qodob hoosaadka (1) ee qodobkan, waxay warbixin u gudbiyaan xafiiska cadaaladda si uu u qaado talaabooyin sixitaan.

15. Xafiiska Guddiga

Xafiiska cadaaladda ayaa guddiga u diyaarin xafiis ku haboon shaqada iyo shirarka guddiga.

16. Nidaamka Shirka ee Guddiga

1. Kulanka caadiga ah ee Golaha wuxuu qabsoomayaa bishiiba hal mar, hase yeeshee, markasta oo ay lagama maarmaan noqoto wuxuu yeelan karaa kulan deg deg ah oo aan caadi ahayn.

3. ቁጥራቸው በመንግስት የሚወሰን የኮሚቴ አባላት ስብሰባ እና ምክትል ስብሰባ በጠቅላይ ዓቃቤ ሕግ አቅራቢነት በመንግስት ይሾማሉ።

4. የኮሚቴ አባላት የሰራ ዘመን አምስት አመት ይሆናል። ሆኖም ድጋሚ ለተጨማሪ አምስት አመት ሊሾሙ ይችላሉ።

5. የኮሚቴው ተጠሪነት ለፈትህ ቢሮ ይሆናል።

14. የኮሚቴው ስልጣንና ተግባር

ኮሚቴው ፡-

1. የማረሚያ ቤት ኮሚሽን ለእስረኞች የሚያደርገውን አያያዝ ህገ መንግስቱን፣ ሀገሪቱ የተቀበለቻቸውን ዓለም አቀፍ የሰብዓዊ መብት ስምምነቶች ፣ ይህን አዋጅ እና ሌሎች ህጎችን ያከበረ መሆኑን ያረጋግጣል።

2. የእስረኞች አያያዝን ለማሻሻል ከባለድርሻ አካላት ጋር በምክክር ይሰራል።

3. የእስረኞች አያያዝ በዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ የተመለከተውን ያካከበረ በሆነ ጊዜ የእርምጃ እርምጃ እንዲወሰድ ለፈትህ ቢሮ ሪፖርት ያደርጋል።

15. የኮሚቴው ጽሕፈት ቤት

ኮሚቴው በክልሉ ፈትህ ቢሮ የሚደራጅ የራሱ ጽሕፈት ቤት ይኖረዋል።

16. የኮሚቴው የስብሰባ ሥርዓት

1. ኮሚቴው ቢያንስ በሶስት ወር አንድ ጊዜ ይሰበሰባል። ሆኖም አስፈላጊ ሆኖ ሲገኝ በስብሰባው ጥሪ በማንኛውም ጊዜ ሊሰበሰብ ይችላል።

3. The Members of the Committee, including the Chairperson, shall be appointed by the Government upon recommendations of the Justice Bureau; and their number shall be determined by the Government.

4. The term office of Committee members shall be five years. But any member may be appointed for another five years.

5. The Committee shall be accountable to the Justice Bureau.

14. Powers and Duties of the Committee

The Committee shall: -

1. ensure the treatment of prisoners by the Commission respects the Constitution, international human rights agreements Ethiopia has accepted, this Proclamation and other relevant laws.

2. consults with the relevant stakeholders on the improvement of the treatment of prisoners.

3. Where the treatment of prisoners did not comply with provisions indicated under sub-article (1) of this Article, submit a report to the Justice Bureau for corrective measures.

15. Secretariat of the Committee

The Committee shall have its own secretariat to be organized by the Justice Bureau.

16. Committee Meetings

1. The Committee shall hold meeting at least once in three months. But when necessary, it can meet at any time up on notice of the chairperson.

- 2. Shirarka guddigu wuxuu ku qabsoomayaa marka ay xubnaha golaha sadex meelood laba meel ay joogaan (2/3).
- 3. Go'aanada guddigu waxay ku meel marayaan sadex meelood laba meel xubnaha ka soo qayb galay shirka (2/3).
- 4. Iyadoo arrimaha lagu xusay qodobkan sidooda ahaanayaan, guddigu wuxuu dajisan karaa nidaam u gaar ah oo shirarkiisa la xidhiidha.

QAYBTA AFRAAD

MAAMULKA BOOLISKA

ASLUUBTA

17. Mudada adeeg-bixinta

Xubinka Booliska asluubta waxaa waajib ku ah inuu adeega Bixiya todoba sano, faahfaahinta waxaa lagu xeerin xeernidaameedka uu soo saaro golaha hawfulintu.

18. Xuquuqaha xubnaha booliska asluubta

Xubnaha booliska asluubtu waxay yeelanayaan xuquuqahan:

- 1. In la siiyo mushaharkiisa oo waafaqsan heerka lagu salgooyay derajada uu ku qoranyahay.
- 2. In la siiyo dirayska, cunada, gunooyinka, qalabka iyo adeegyada caafimaad ee lagu xeeriyay xeernidaameedka uu soo saaro golaha hawfulintu.
- 3. In loo qabto qareen difaaca, hadii lagusoo eedeeyo faldambiyeed uu galay waqtiga u uku gudajiro gudashada waajibaadkiisa.
- 4. In la siiyo hawlgabka ku haboon ee lagu xeeriyay sharciyada hawlgabka marka uu shaqada uga fadhiisto dhaawac ama laxaad beel ku yimiday sabab la xidhiidha gudashada waajibaadkiisa.

- 2. ከኮሚቴው አባላት ከግማሽ በላይ ሲገኙ ምልዓተ ጉባኤ ይሟላል።
- 3. የኮሚቴው ውሳኔዎቹን በተገኙ አባላት በሁለት ሦስተኛ ድምጽ ይወሰናል።
- 4. ኮሚቴው የራሱ የአሰራር መመሪያ ሊያወጣ ይችላል።

ከፍል አራት

የማረሚያ ፖሊስ አስተዳደር

17. የአገልግሎት ዘመን

የማረሚያ ፖሊስ አባላት የግዴታ አገልግሎት ዘመን ሰባት ዓመት ይሆናል። ዝርዝር አፈጻጸሙ በክልሉ መስተዳድር ምክር ቤት በሚወጣ ደንብ ይወሰናል።

18. የማረሚያ ፖሊስ መብት

የማረሚያ ፖሊስ አባላት:-

- 1. በመንግሥት በሚፀድቅ የደሞዝ ስኬል መሠረት ደመወዝ ያገኛል፤
- 2. በክልሉ መስተዳድር ምክር ቤት በሚወጣ ደንብ መሠረት ቀለብ፣ ልዩ ልዩ አበሎች፣ የደንብ ልብስና የሕክምና አገልግሎት ያገኛል፤
- 3. ሥራውን በተገቢው መንገድ በመወጣት ላይ እያለ ለሚደርስበት ተጠያቂነት በኮሚሽኑ ወጪ የጥብቅና አገልግሎት ያገኛል። ዝርዝር አፈጻጸሙ በደንብ ይወሰናል፤
- 4. ከሥራው ጋር በተያያዘ በደረሰበት ጉዳት ምክንያት ሙሉ በሙሉ ወይም በከፊል የመሥራት ችሎታውን በዘላቂነት ሲያጣ አግባብ ባለው የጡረታ ሕግ የተሰጠው መብት ይከበርለታል፤

- 2. A quorum shall be constituted where more than half of the Committee members are in attendance.
- 3. The Committee shall give its decisions by a two-thirds majority of those in attendance.
- 4. The Committee may issue its own rules of procedure.

PART FOUR

PRISON POLICE

ADMINISTRATION

17. Term of Service

The compulsory term of service of a prison police shall be seven years. Particulars shall be determined by Regulation to be issued by the Executive Council of the Regional State.

18. Rights of Prison Police

A prison police officer shall be entitled to:

- 1. a salary according to the scale approved for the rank of the police officer;
- 2. ration, allowances, uniform and medical services in accordance with the administrative regulation to be Issued by the Executive Council;
- 3. the services of an attorney at law at the Commission's expense for liabilities incurred while carrying out his task within the scope of his duties.;
- 4. pension in accordance with the pertinent law when he permanently loses his working capacity fully or partially because of an accident in connection with his duties; and

5. Inuu cabasho gusbisto hab waafaqsan kala sareynta derajada iyo qaab-dhismeedka komishinka.

19. **Wajibaadka xubnaha booliska asluubta**

Xubnaha booliska asluubtu waa inuu guto waajibaadka saran isagoo:

- 1. Si buuxda u ilaalinaya xuquuqaha lagu bayaamiyay dastuurka dalka, dastuurka deegaanka iyo shuruucda caalamiga ah ee dalku saxee xay.
- 2. Hab waafaqsan qaab-dhismeedka iyo nidaamka shaqo ee komishinku aasaaso wuxuu gaar ahaan iyo wadjir ahaanba masuul uga yahay saamaynta ka timaada go'aanada uu qaato.

20. **Dhaarta**

1. Xubin-kasta oo loo xulay inuu ka mid noqdo Booliska asluubta Dawlada Deegaanka Soomaalida, marka uu dhamaysto Tababarka Boolisnimo kahor intaanu shaqada bilaabin waa inuu ku dhaartaa, Dhaartan hoos ku xusan:

“Aniga oo ah _____, waxaan dhaar ku marayaa inaan Xurmeeyo isla-markaana aan diffaaco Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga fedaraaliga ah ee Itoobiya, Dastuurka Dawladda Deegaanka Soomaalida iyo Dhamaan Shuruucda kale ee Dalka, in aan ilaaliyo sirta Dawlada ee sida gaarka ah sharciga loogu xaddiday in aan la bixin karin, inaan u Hogaansamo in aan si ka go'naansho ay ku dheehantahay uga hortago fal-dambiga, shaqadeydana aan u gudanayo si Daacadnimo, Cadaalad iyo Sinaan leh, islamarkaana ay ii siman yihiin dhamaan Muwaadiniinta oo aanan ku kala Takoorayn Qabiil, Qoomiyad, Diin, Midab, Hanti iyo Jinsi midna, meel-kasta oo ka mid ah Degaankana, in aan ka shaqayn.”

5. የሥልጣን ተዋረድን ጠብቆ አቤቱታ ማቅረብ ይችላል።

19. **የማረጋገጫ ፖሊስ ግዴታ**

የማረጋገጫ ፖሊስ:-

- 1. በሕገ-መንግሥቱና ሀገሪቱ በተቀበለቻቸው ዓለም አቀፍ ድንጋጌዎች የተረጋገጡ መሠረታዊ መብቶችና ነፃነቶች ሙሉ በሙሉ በማክበር እንዲሁም በሌሎች አግባብ ባላቸው ሕጎች መሠረት ሥራውን የማከናወን፤
- 2. ኮሚሽኑ በሚያስቀምጠው አሠራርና አደረጃጀት መሠረት ሥራውን የመስራት፤ በቡድን ሥራዎች እና ውሳኔዎች የጋራና የገጠላ ኃላፊነት መውሰድ።

20. **ቃለ መሐላ**

ማንኛውንም በሱማሌ ክልላዊ መንግሥት ለማረጋገጫ ፖሊስ ሥራ የተቀጠረ ምልዎል ታማኝ በመሆን የተጣለበትን ሕዝባዊ አደራና ሙያዊ ኃላፊነት ለመወጣት ቃለ መሐላ ይፈጽማል። የቃለ መሐላው ይዘት እንዳሚከተለው ይሆናል።

እኔ ----- በዛሬው እለት በሱማሌ ክልል የማረጋገጫ ቤት ፖሊስ ኮሚሽን አባል ሆኜ ሥራዬን ሰጀምር ለኢትዮጵያ ፌዴራላዊ ዲሞክራሲያዊ ሪፐብሊክ እና የሱማሌ ክልል ሕገ-መንግሥቶች እና ሌሎች የሀገሪቱን ህጎች የማክበር እና የመጠበቅ እና በተለይም በህግ የተገደበ የመንግስትን ሚስጥራዊነት የመጠበቅ ሀላፊነትን እንዳሚወጣ ። ወንጀልን ለመከላከል፣ ተግባራት በታማኝነት፣ በፍትሃዊነት እና በፍትሃዊነት ለመወጣት፣ በዘር፣ በጎሳና በብሔር ሳይለይ ለሁሉም ዜጎች እኩል ለመሆን ቁርጠኛ ነኝ። ሃይማኖት፣ ንብረት፣ ጾታ፣ እና በክልሉ ውስጥ በማንኛውም ቦታ ላይ ለመስራት ቃል እገባለሁ።”

5. lodge complaints by following existing hierarchy of the Commission.

19. **Obligations of Prison Police**

A prison police officer shall discharge his duties:

- 1. by fully respecting the fundamental rights and freedoms enshrined in the National and State Constitutions and treaties ratified by Ethiopia as well as in accordance with the other relevant laws;
- 2. in accordance with the operational rules and institutional setup put in place by the Commission. And shall entail joint and several responsibilities of group operations and decisions.

20. **Oath**

Every recruit employed as a prison police of Somali Regional State shall take oath of loyalty to his duties public responsibility and professional responsibility entrusted to him. The contents of the oath shall be as follows: -

“I _____, swear upon assumption of my duties to respect and defend the Constitutions of the Federal Democratic Republic of Ethiopia and Somali Regional State and all other laws of the land, and to maintain the secrecy of the Government which is specifically restricted by law. I will to be committed to the prevention of crime, to perform my duties honestly, fairly and equitably, and to be equal to all citizens without discrimination on the basis of race, ethnicity, or nationality. Religion, pr’operty, gender, and work in anywhere in the Regional State”.

21. **Derajada**

- 1. Komishinku wuxuu diyaarin islamarkaana hirgelin derajooyinka kala duwan ee la siinayo xubnaha booliska asluubta.
- 2. Xubinka booliska asluubtu waa in la siiyaa calaamad iyo astaan muujinaysa derajadiisa iyo masuuliyadda uu hayo.

22. **Derajooyinka iyo heerarka masuuliyadeed ee booliska asluubta**

- 1. Booliska asluubtu waxay yeelanayaan derajooyinkan:
 - b) Konistaabil
 - t) Caawiye Saajin
 - j) Saajin Ku-xigeen
 - x) Saajin
 - kh) Saajin sare
 - d) Caawiye Inisbeektar
 - r) Inisbeektar Ku-xigeen
 - s) Inisbeektar
 - sh) Inisbeektar Sare
 - dh) Kumaandhar Ku-xigeen
 - c) Kumaandhar
 - g) Caawiye Kumishineer
 - f) Kumishineer Ku-xigeen
 - q) komishineer
 - k) Kom/Kuxigeen Janaraal
 - l) Komishineer Janaraal

21. **ሰለጣዕሪግና ምልክት**

- 1. ኮሚሽኑ የተለያዩ ደረጃዎች ያላቸው የማረሚያ ፖሊስ ሰለጣዕሪግና ምልክት ይኖረዋል።
- 2. የማረሚያ ፖሊስ ደረጃውንና ኃላፊነቱን የማገልጽ የማረሚያ ፖሊስ ሰለጣዕሪግና ምልክት ይኖረዋል።

22. **የማረሚያ ፖሊስ ሰለጣዕሪግና የሥልጣን ደረጃ**

- 1. የማረሚያ ፖሊስ ሰለጣዕሪግ የሚከተሉት ይሆናሉ:-
 - ሀ) ኮንስታብል፤
 - ለ) ረዳት ሳጅን፤
 - ሐ) ምክትል ሳጅን፤
 - መ) ሳጅን፤
 - ሠ) ዋና ሳጅን፤
 - ረ) ረዳት ኢንስፔክተር፤
 - ሰ) ምክትል ኢንስፔክተር፤
 - ሸ) ኢንስፔክተር፤
 - ቀ) ዋና ኢንስፔክተር፤
 - በ) ምክትል ኮሚንደር፤
 - ተ) ኮሚንደር፤
 - ቸ) ረዳት ኮሚሽነር፤
 - ኀ) ምክትል ኮሚሽነር፤
 - ኘ) ኮሚሽነር፤
 - ኘ) ምክትል ኮሚሽነር ጄኔራል፤
 - ከ) ኮሚሽነር ጄኔራል።

21. **Ranks and Insignia**

- 1. The Commission shall have different levels of prison police ranks and insignia.
- 2. A prison police officer shall have prison office rank and insignia that shows his rank level and responsibility.

22. **Prison Police Ranks and Level of Authority**

- 1. The ranks of the prison police shall be as follows:
 - a) Constable;
 - b) Assistant Sergeant;
 - c) Deputy Sergeant;
 - d) Sergeant;
 - e) Chief Sergeant;
 - f) Assistant Inspector;
 - g) Deputy Inspector;
 - h) Inspector;
 - i) Chief Inspector;
 - j) Deputy Commander;
 - k) Commander;
 - l) Assistant Commissioner;
 - m) deputy Commissioner;
 - n) Commissioner;
 - o) Deputy Commissioner General; and
 - p) Commissioner General.

2. Dhamaan derajooyinka booliska asluubta ee lagu sheegay qodob hoosaadka (1) ee qodobkan marka laga reebo (k) iyo (l) waxay yeelanayaan astaan u gaar ah.

23. Abaalmarinta iyo shahadooyinka

Komishineerka guud waxa uu siin xubnaha booliska asluubta ama koox kamid ah ee la yimaadaa waxqabad iyo gudasho waajibaad oo ku dayasho mudan, hal abuur iyo geesinimo.

24. Xuquuqaha hawlgabka ee xubnaha booliska asluubta

Xuquuqaha hawlgabka ee bayaanka hawlgabku siiyay booliska ayaa dhaqangal ku ah xubnaha booliska asluubta.

25. Da'da hawlgabka

1. Da'da hawlgabka ee booliska asluubtu waxay noqonaysaa sidan:

b) da'da hawlgabka xubnaha derajadoodu u dhaxayso koonistaabal ilaa saajin sare waa 50 sano.

t) da'da hawlgabka xubnaha derajadoodu u dhaxayso caawiye inisbektar ilaa inisbektar waa 52 sano.

j) da'da hawlgabka xubnaha derajadoodu u dhaxayso inisbektar sare ilaa komishineer waa 52 sano.

2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn arrimaha lagu sheegay qodob hoosaadka (1) ee Qodobkan, dad'da hawlgabka ee xubnaha booliska asluubta waxaa la kordhin karaa muddo aan la badnayn shan sano.

3. Kordhinta da'da hawlgabka ee lagu xeeriyay farqada (2) ee qodobkan waxaa la samayn karaa marka:

2. በዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ (፩) ከተመለከቱት የሥልጣን ደረጃዎች ውስጥ በፊደል (ኘ) እና (አ) በስተቀር ሌሎች የማረጋገጫ ፖሊስ ማዕረጎች የራሳቸው ምልክት ይኖራቸዋል።

23 ሽልማቶች እና የምስክር ወረቀት

ኮሚሽነር ጄኔራሉ የላቀ ተግባር ለፈፀመ፣ አዲስ ግኝት ላሰገኘ ወይም የሚያስመስግን አገልግሎት ላበረከተ ፖሊስ ወይም ቡድን ሚዳይ ወይም የምስክር ወረቀት ሽልማት ይሰጣል።

24. የማረጋገጫ ፖሊስ የጡረታ መብት

በጡረታ አዋጅ ለፖሊስ አባላት የተደነገገው የጡረታ መብት ለማረጋገጫ ፖሊስ አባላትም ተፈጻሚ ይሆናል።

25. የጡረታ መውጫ ዕድሜ

1. የማረጋገጫ ፖሊስ የጡረታ መውጫ ዕድሜ፡-

ሀ) ከኮንስታብል እስከ ዋና ሳጅን ማዕረግ 50 ዓመት፣

ለ) ከረዳት ኢንስፔክተር እስከ ኢንስፔክተር ማዕረግ 52 ዓመት፣

ሐ) ከዋና ኢንስፔክተር እስከ ኮሚሽነር ማዕረግ 52 ዓመት፣ ይሆናል።

2. የዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ ፩ ድንጋጌ ቢኖርም ለኮሚሽነት ሥራ አስፈላጊ ሆኖ ሲገኝ የማረጋገጫ ፖሊስ አባል የአገልግሎት ዘመን ከጡረታ መውጫ ዕድሜ በኋላ ከ5 ዓመት ላልበለጠ ጊዜ ሊራዘም ይችላል።

3. በዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ 2 ማረጋገጫ ፖሊስ አባል የጡረታ መውጫ ዕድሜው ከደረሰ በኋላ የአገልግሎት ዘመኑን ማራዘም የሚችለው፡-

2 The ranks of prison police officers specified under sub-article (1) of this Article with the exception of sub-article (o) and sub-article (p) shall have their respective insignia.

23. prizes and Certificates

The Commissioner General shall award medals, prizes and certificates to a prison police officer or a group of prison police officers for outstanding accomplishment of missions, innovations or meritorious services.

24. Prison Police Retirement Pension Rights

The retirement pension rights provided for police officers under the public servant's pension proclamation shall, mutatis mutandis be applicable to prison police officers.

25. Retirement Age

1. The retirement age applicable to prison police officers shall be as follows:

a) for police officers having ranks from Constable to Chief Sergeant, 50 years;

b) for police officers having ranks from Assistant Inspector to Inspector, 52 years; and

c) for police officers having the ranks of Chief Inspector to Commissioner, 52 years.

2. Notwithstanding sub-article 1 of this Article, where it becomes necessary for the Commission's work the retirement age of a prison police officer may be extended for a period not exceeding five years.

3. the service of the prison police may be extended under sub-Article 2 of this Article where:

- b) Aqoonta, Kartida iyo Waayo-aragnimada Xubinku ay muhiim u noqoto Shaqada Komishinka.
- t) La Xaqiijiyo in aan la heli Karin xubin lagu beddelo Booska Dhinaca Waayo aragnimada iyo Kartida Awgeed.
- j) Dhakhtar uu soo cadeeyo in Xubinku shaqada Qaban karo.
- x) Xubinku Oggolaado in uu wado Shaqada.

QAYBTA SHANAAD

NIDAAMKA HAYNTA

MAXAABIISTA

Qayb-hoosaadka Koobaad

Qaabilaada maxaabiista

26. Xaqiijinta xukunada maxkamada

Waxaa reeban in komishinka qaabilo maxbuus isaga oo aan xaqiijin amarka ama go'aanka maxkamada ee khuseeyo maxbuustaas.

27. nidaamka xafidaada xogta

- 1. Xabsi kastaa waa inuu qaab casri ah u xafido xog dhamaystiran ee maxaabiista ku jirta xabsigaas.
- 2. Xabsiyadu marka ay qaabilayaan maxbuuska waa inay diiwaangeliyaan xogahan:
 - b) Magaca oo sadexan, Da'da, sinjiga, jinsiyada iyo ciwaankii hore;
 - t) nooca dambiga ama sababta loo soo xidhay iyo tirsiga gal-dacwadeedka;
 - j) maxkamada bixisay amarka
 - x) taariikhda dib loo geynayo maxkamada ama xukunka;
 - kh) mudada uu xabsiga ku jirayo iyo taariikhda lasii daynayo;

- ሀ) የማረጋገጫ ቤት ፖሊስ አባሉ ትምህርት፣ ልዩ እውቀትና ችሎታ ለኮሚሽኑ ጠቃሚ ሆኖ ሲገኝ፤
- ለ) የማረጋገጫ ፖሊስ አባሉን በደረጃ እድገት፣ በዝውውር ወይም በቅጥር ተተኪ ማግኘት አለመቻሉ ሲረጋገጥ፤
- ሐ) የማረጋገጫ ቤት ፖሊስ አባሉ ለሥራ ብቁ መሆኑ በሕክምና ማስረጃ ሲረጋገጥ፤ እና
- መ) የማረጋገጫ ቤት ፖሊስ አባሉ አገልግሎቱን ለመቀጠል ሲሰማ፣ ነው።

ክፍል አምስት

ሰለጠኖች አያያዝ

ንዑስ ክፍል አንድ

የአሰሪዎች አቀጣበል

26. የፍርድ ቤት ትዕዛዝ መኖሩን ስለማረጋገጥ

የማረጋገጫ ቤት በሕግ ሥልጣን በተሰጠው ፍርድ ቤት የተሰጠ ትዕዛዝ ወይም ውሳኔ መኖሩን ሳያረጋግጥ ማንኛውንም ሰው መቀበል አይችልም።

27. የመረጃ አያያዝ ሥርዓት

- 1. የማረጋገጫ ቤት እያንዳንዱን አሰሪዥ በተመለከተ በተሟላ ሁኔታ መረጃ የሚይዝበት ደረጃውን የጠበቀ ዘመናዊ የመረጃ አያያዝ ሥርዓት ይኖረዋል።
- 2. የማረጋገጫ ቤት አሰሪዎችን ሲቀበል ወዲያውኑ የሚከተሉትን መረጃዎች መመዘገብ አለበት:-
 - ሀ) ሙሉ ስም፣ እድሜ፣ ፆታ፣ ዜግነት እና የቀድሞ አድራሻ፤
 - ለ) የታሰረበት የወንጀል ዓይነት ወይም ምክንያት እና መዝገብ ቁጥር፤
 - ሐ) ትዕዛዙን የሰጠው ፍርድ ቤት፤
 - መ) የቀጠሮ ቀን ወይም የፍርድ ልክ፤
 - ሠ) በማረጋገጫ ቤት የሚቆይበትን እና የሚፈታበትን ጊዜ፤

- a) his qualification, special skill and ability is found to be essential to the Commission;
- b) it is not possible to replace him through promotion, transfer or recruitment.
- c) he is proven fit for the service by medical certificate.
- d) he has agreed to the extension of his service.

PART FIVE

TREATMENT OF PRISONERS

SECTION ONE

ADMISSION OF PRISONERS

26. Confirmation of Court Orders

No prison shall admit any person without insuring the issuance of an order or a decision by a competent court.

27. Record Keeping

- 1. A prison shall have an up-to-date and modern record keeping system to maintain full information of each prisoner.
